

KU DHAQAN XAFIIS D.



# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Moqdisho, Tr. 21 Febrayo 1974

L. 1-R. L. 2

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIN BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 6 Tr. 10 Febrayo 1974 — *Wax ku kordhin sharciga lambar. 71 taarikh 11 Nofember 1971, ku saabsan Hawsha Qaranka.*

Bog. 112

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 3 Febrayo 1974, L. 20 — *Dhismaha Safaaradda cusub J. D. S. ee Dooxa (al Qatar State).*

» 113

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 24 Jennayo 1974, L. 21 — *Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Marka, Qaybta Walkiilada Beesha.*

» 114

## BOGGA SEDEEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul  
*Jaalle Cabdullahi Xussen Ibraahim. (36)*

Bog. 116

|  |          |
|--|----------|
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul<br><i>Jaalle Xalima Moxamed Axmed. (37)</i>                         | Bog. 117 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad<br><i>Dhul Jaalle Jina Ibrahim Moxamed. (38)</i>                     | » 118    |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad<br><i>Dhul Jaalle Maye Moxamud Moxamed. (39)</i>                     | » 118    |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad<br><i>Dhul Jaalle Salax Cumar Moxamed Arman. (40)</i>                | » 119    |
| GUDDOMIYAHA GOLAHA KISMAYO, Ogeysiis Naada<br><i>Dhul Jaalle Xagi Cismaail Saciid Cismail. (41)</i>              | » 119    |
| MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Dhumida<br><i>Buugga L. 3069 — Xalima Axmed Warsame. (42)</i>                 | » 119    |
| MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Jeeg<br><i>L. 170880 — Akbar Cali Rajab. (43)</i>                             | » 120    |
| MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Jeeg<br><i>L. 005562 — Maxamud Xaji Saciid. (44)</i>                          | » 120    |
| SHARIKADA SOMALI BRISKS & TILES — <i>Ogeysiis Fa-<br/>dhi markay tahay 31ka March 1974. (45)</i>                 | » 121    |
| SOCIETA' FRATELLI LOCHE - S.p.A. — <i>Avviso di Con-<br/>vocazione Assemblea Ordinaria e Straordinaria. (46)</i> | » 121    |
| S.N.A.I. B.I.A. S.A. JOWHAR — <i>Avviso di Pubblicazione<br/>del Bilancio 1971. (47)</i>                         | » 122    |

---

SHARCI L. 6 Tr. 10 Febrayo 1974.

Wax ku kordhin sharciga lambar 71 taarikh 11 Nofembar 1971 ku saabsan Howsha Qaranka.

### GUDDONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshadii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 71 taarikhdiisuna tahay 11 Nofembar 1971 kuna saabsanaa Hawsha Qaranka;

ISAGA OO TIX GELINAYAA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

### WUXUU SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1

Qodobka 3aad ee sharciga tiradiisu tahay 71 taarikhdiisuna tahay 11 Nofembar 1971 kuna saabsan Hawsha Qaranka, waxaa lagu kordhiyay Waax (paragrafo) seddexaad oo loo akhriyi doono sida soosocota:  
«Hadii baahi loo qabo ama maslaxad caam ahi Dowladda u muu-

qato; ardayda ka soo baxda Dugsiyada Sare, waxaa loo dirj karaa Shaqada Qaranka (b), ka hor inta aanay gelin tababarka militariga iyo haanuunta (a). Hadii taa ay dhacdo, ardayda oo dhameysata shaqada Qaranka waxaa loo diri doonaa tababar militariga. Marwaliba kala horumarinta labada howleed waxaa shaqo ku leh Xoghaayaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ».

## Qodobka 2

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Noofembre 1973 waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.  
Muqdisho, 10 Febbrayo 1974.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*  
GUDDONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

## XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

3 Febrayo 1974, L. 20.

Dhismaha Safaaradda cusub J. D. S. ee Dooxa (Al Qatar State).

## MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADO LA ARKAY Xaashida Kowaad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo uu wareejinaysey Maamulka Sharciga, Dawladda iyo qawaninta dalka;

IYADO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraariga Somaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay dawladdu, Sharci Lam. 14 ee 3-6-1962;

IYADO LA ARKAY Xeer Lam. 126 Dhismaha Wasaaradda arrimaha dibedda ee 8dij Majo 1972 iyo xerkii MGSK ee 3dii Febrayo 1973 Lam. 48.

IYADO LA OGAADAY Baahida loo qabo in Safaarad cusub la furo;

IYADO LA DHEGAYSTAY Talooyinkii Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## AMARXEER

### Qodobka 1aad

Waxa la gartay in xiriir siyaasadeed uu ka dhaxeeyo Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somaliyeed iyo Dawladda Qatar.

Qodobka 2aad

*Dhismo Safaarad Cusub*

Waxa la gartay in Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somaliyeed ay ka furato Safaarad Waddanka Dawladda Qatar.

Qodobka 3aad

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda waa inay qaadaan xilka Maamulka Dhismaha Safaaradda cusub ayagoo hirgelinaayaa amarka xeerkan.

Qodobka 4aad

Amarxeerkan waa inuu dhaqangalaa si dhaqsa ah, kuna soo baxaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somaliyeed. Muqdisho, 3-2-1974.

*Jaalle S. Gaas Moxamed Siyaad Barre*  
MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

24 Jennayo 1974, L. 21.

Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Marka, Qaybta Wakillada Beesha

**WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

ISAGOO ARKAY Xaarshida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Qodobka 10aad iyo kan 16aad lambarkiisu 3aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972kii

ISAGOO ARKAY Xeer Dowladeedka lambarkiisu yahay 12120, taarikh 13-12-1972 oo hore loogu magacaabay Idaarada Degmada Marka — qaybteeda Wakillada Beesha;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Shabeelada Hoose;

ISAGOO OGAADAY In ay thay lagama maarmaan in si habsami ah oo waafaqsan sharciga, dib loogu magacaabo tirada ka dhiman Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Marka, qaybta Wakiilada Beesha isla markaasana laga saaro dad aan beesha Wakiil ka noqon karin oo u shaqeyee Wakiilado iskood u madaxbannaan iyo dad gudan waayey waajibkii Xubinnimada Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada.

## WUXUU GOOYEY

### Qodobka 1aad

Ka bilaabata taariikhda Xeerkan in laga saaro Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Marka dadka magacyadoodu ku taxanyahiin xuufuuta.

(a) iyo (b) ee halkan hoose ku qoran:

dadka magacyadoodu ku taxanyihiin xarafka (a) sababta looga saaray waxay tahay iyagoo u shaqeeya Wakaalado iskood u madaxbannaan isla markaas xubno beesha ka socda aan noqon karin, kuwa magacyadoodu ku taxanyihiin xarafka (b) waxaa la habsaday in ay gudan waa-yeen waajibkii xubinnimada Guddiga Kacaanka Degmada:

- a) 1. Xasan Cali Moxamed — oo u shaqeeya Wakaaladda Muuska
2. Moxamed Moxamuud Cusmaan — oo u shaqeeya Wakaaladda Muuska
3. Cabdi Ibraahim Cabdi — oo u shaqeeya Wakaaladda Dekedda Marka
4. Siido Xaaji Ibraahim — oo u shaqeeya Wakaaladda Dekedda Marka.
- b) 1. Moxamed Warsame Cali
2. Xaaji Moxamed Moxsin
3. Muuse Sheekh Xasan
4. Xaaji Aba Cali Moxamed
5. Sheekh Moxamuud Cilmi Cibaar.

### Qodobka 2aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Marka — qaybta Waakiillada Beesha waxay ka koobnaan doontaa dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxanyahiin:

1. Sheekh Moxamed Sheekh Cabdi
2. Xabiibi Abanuur Dheere
3. Xaaji Bashiir Cali
4. Maryan Xaaji Yuusuf
5. Jaamac Ismaaciil Cali
6. Abu Maye Xabiib Axmed
7. Cali Yarow Ibrahim
8. Salaad Daahir Guulced — oo hore loogu magacaabay xeerka xaggan sare ku qoran

9. Faaduma Moxamed Caruush
10. Luul Moxamed Cusmaan
11. Qamar Cali Munye
12. Xaliimo Xasan Shimaale
13. Khadiija Caliyoow Dhurre
14. Mustaf Cabdi Munye
15. Xasan Siyaad Shuuriye
16. Ciise Xaamud
17. Dheere Booro Moxamed — oo lagu magacaabay Xeerkan.

Qodobka 3aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Jennayo 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
S. Gaas Xuseen Kulmiye

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 20.*  
*Mogadiscio, li 29 Gennaio 1974.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH**

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullahi Xuseen Ibrahim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 20-1-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh

qiyaas rektaangulaar — 30x20 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Xasan Xaaji; Galbeed Jidka Jert. Daaud; Bari Cumar Calasow.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Febbraiyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(36)

*Inj. C. I. Jaamac*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Maxamed Axmed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-1-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas 26.50x14.00 rektaangular, kuna fadhiya 371,00 mdh.

Soohdin: Waqooyi Maxamed Yabarow; Koofur Jid. Galbeed Jidka Jubbada sare; Bari Maxamed Cadde.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Febbraiyo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(37)

*Inj. C. I. Jaamac*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Beddelaad naado dhul ay leedahay Jaalle Jina Ibrahim Moxamed ku yaal Muqdisho — Xafadda Shibis — T. G. 1662-61.*

Jaallada kor ku magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku yaal Xafadda Shibis ku na fadhiiyay 2000 mdh., waxaa la caddeynayaa in laga jarey cad dhul qiyaashisu tahay 1220 mdh. dan guud ahaaned.

Dhulku wuxuu beddelay 780 mdh. ee ma'aha sidii hore ay ahayd 2000.

Sohdimaha:

Waqooyi: waxaa ka xiga Jidka Cusub ee la yirahdo «Umadda»;  
Konfur; waxaa ka xiga Cabdulqadiin Suufi;  
Galbeed; waxaa ka xiga Faduma Cadoow;  
Bari: waxaa ka xiga Jid.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(38)

*Inj. C. I. Jamac*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Beddelaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Maye Moxamuud Moxamed kuna yaal Muqdisho, Xafadda Shibis — T. G. N. 186-66.*

Jaallaha kor magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Shibis, kuna fadhiiya 288 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 931201 22-3 1966, waxay isku beddeshay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21 Oktoobar Hawl-Wadaag., waxuuna leeyahay qiyaas Rettangolare 40x30, oo ku fadhiiya 1200 mdh., soohdin waxuu la leehay;  
Waqooyi Dhul lamb. yahay 159;  
Koofur Jid.;  
Galbeed Dhul lamb. yahay 161.  
Bari Dhul amb. yahay 182.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(39)

*Inj. C. I. Jamac*



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Beddelaad naado magac — T. G. 500*

Waxaa la cadeynayaa in magacii hore oo lagu sii diray xanshida naadada lam. ahayd MW-3-23-444 ee 13-6-72kii oo ku qoraa Cumar Moxamed Armaan inow ahaa qalad ee magaca saxa ah u yahay Salax Cumar Moxamed Armaan.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(40)

*Inj. C. I. Jamac*

---

GUDDOMIYAHA GOLAHA KISMAYO

---

N A A D A D H U L

Waxaa loo shegayaa dhammaanba dadka deggan degmada in aanu soo dejinay digniinkaa ee una deganadoono 30 maalmood, digninka ku saabsanyahay dhul uu soo weydistay in loo ogolaado Jaalle Xaji Ismacil Saciid Ismacil, dhulka oo u soo weydistay wax uu ku yaal jidka cusub ee ambulatooriyada degmadaan.

Dadka ay dani ugu jirto waxaa loo shegayaa in ay war Faahfaahsan ka helidoono Xafiiska Guddomiyaha Degmada Kismayo.

Guddomiyaha Golaha Degmada

(41)

*Abdurahmaan Cabdi Xuseyn*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

Waxaan arkay dacwaddatan ay soo qortay Xalima Axmad Warsame, waana wax ku Saabsan Shaqada Xafiiskan, Haddaba Markaan arkay Qodobka 69 D. L. del 9-65, n. 2;

Waxaa Cad dhumista Buugga L. 3069, Sh. So. 5000 ee Bankiga KAYDDA iyo Ammaahda, Waxaan amrayaa in loo Cusbooneysiyo Marlabaad Buugga Muddo 30 beri ah oo ka bilaabato, Markii lagu dhigo

Bollettino Ufficiale Haddan la helin qof kale oo Sheegta Buugga Waxaa Kaloo la Cadeynayaa in Buugga Gacanta Laga saaridoono Qofka aan Kor ku soo Sheegnay ama qof ka Sita Wakaalad Iyadoo la Sugaayo 30 kaas Beri.

Muqdisho, 3-2-1974.

(42)

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Xamar  
*W. S. Dr. Xuseen Shiikh Cabduraxman*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

---

Waxaa arkay dacwaddatan ay soo qortay akbar Cali Rajaboo waana wax ku saabsan shaqada xafiiskan, haddaba markaan arkay qodobka 69 D. L. del 1965, n. 2;

Waxaa cad dhumista jeeg lam. 170880 di Shs. So. 20.000, Bangiga Ganacsiga Laanta Kismaayo waxaan amrayaa in loo cusbooneysiyo mar labaad jeega mudo 15beri ah oo laga bilaabo, markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale haddan la helin qof kale oo sheegta jeegaas waxaa kaloo la cadeynayaa in jeegaas gacanta laga saaridoono qofka aan kor ku soo sheegnay ama qof ka sita wakaalad iyadoo la suggayo 15 kaas beri.

Muqdisho, 13-2-1974.

(43)

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Xamar  
*W. S. Dr. Xuseen Shiikh Cabduraxman*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

---

Waxaan arkay dacwadatan soo qortay Maxamuud Xaaji Saciid, waaxaan waaha ku saabsan shaqada xafiisnaan hadaba markaan arkay qodobka 69 D. L. del 1965, n. 2;

Waxaa cad dhumista jeega lam. 005562 di Shs. So. 3.400 Bangiga Kayda iyo amaahada ee Hargeysa waxaan amrayaa in loo cusbooneysiyo mar labaad jeeggaa a mudo ah 15 beri ah oo laga bilaabo, markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale, haddan la helin qof kalo oo sheegta jeegaas waxaa kaloo la cadeynayaa in jeegaas gacanta laga saaridoono ninka la yiraahdo Maxamuud Xaaji Saciid ama qof ka sita wakaaladda iyadii la sugayo mudo ah 15 beri.

Muqdisho, 17-3-1974.

(44)

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Xamar  
*W. S. Dr. Xuseen Shiikh Cabduraxmaan*

SHARIKADDA SOMALI BRICKS & TILES

---

O G E Y S I I S

Waxa la ogeysiinayaa dadkii qaybta ku lahaa Sharikadda la yidhaa Somali Bricks & Tiles Manufacturing Co. in fadhi loo qabtay bishu markay tahay 31ka March, 1974, saacaddu markay tahay tobanka Saacadood xafiiska Jirde Xusein.

Waxa laga hadlayaa lacagtii qaaday sharikadda iyo wixii maamulkeeda laga Yeeli laahaa.  
Muqdisho, 13-2-1974.

Maamula Guud Sharikadda

(45)

*Jirde Xusein*

---

SOCIETA' FRATELLI LOCHE - S. p. A.

Sede Sociale Mogadiscio — Capitale Sociale Sh. So. 100.000

---

CONVOCAZIONE

DI ASSEMBLEA ORDINARIA E STRAORDINARIA

I Signori Azionisti sono convocati in Assemblea Generale Ordinaria e Straordinaria per il giorno 5 Marzo 1974, alle ore 11 a. m. nella sede sociale in Mogadiscio, Viale del Lazzaretto, ed occorrendo, in seconda convocazione il giorno 6 Marzo 1974, stessa ora e luogo, per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — *PARTE ORDINARIA:*

- a) Relazione dell'Amministratore Unico, e Rapporto del Collegio Sindacale;
- b) Discussione sul Bilancio chiuso al 31 Dicembre 1973, e conseguenti deliberazioni.

2. — *PARTE STRAORDINARIA:*

- a) Mutamento della Ragione Sociale;

- b) Trasformazione della Società Fratelli Loche (S.p.A.), in Società a Responsabilità Limitata;
- c) Riduzione del Capitale Sociale;
- d) Varie ed eventuali.

Potranno intervenire all'Assemblea gli azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni liberi prima di quello fissato per l'Assemblea e quelli che, nello stesso termine, hanno depositato presso la sede sociale, con richiesta di iscrizione nel Libro dei Soci, i titoli azionari di cui sono in possesso.

Mogadiscio, li 6 Febbraio 1974.

p. L'AMMINISTRATORE UNICO

Il Procuratore

*Bile Musse Sciamal*

(46)

---

S. N. A. I. B. I. A. S. A.

Società a responsabilità limitata — Sede sociale in Jowhar

Capitale Sociale Sh. So. 500.000.00 (Cinquecentomila)

---

AVVISO DI PUBBLICAZIONE DEL BILANCIO 1971

Estratto del bilancio e del Conto Profitti e Perdite chiusi al 31 Dicembre 1971. Approvati con Assemblea Generale Ordinaria dei Soci, tenutasi a Giohar il giorno 7-2-1974 (Sette Febbraio Millenovecentosettantaquattro).

|             |         |              |         |              |
|-------------|---------|--------------|---------|--------------|
| Attivo      | Sh. So. | 2.101.716,98 |         |              |
| Passivo     |         |              | Sh. So. | 2.070.378,98 |
| Utile netto |         |              | » »     | 31.329,00    |
|             | Sh. So. | 2.101.716,98 | » »     | 2.101.716,98 |

---

IL PRESIDENTE

del Consiglio di Amministrazione  
*Mohamed Hagi Ahmed*

(47)